

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA
(BEERTA RAAS)



MUQDISHO-SOOMAALIYA



2025



+252 612-223788
+252 615-353330



info@tayonotary.com
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia



MASAWIRKA MILKIILAYAASHA

1-ABDIRAHIN KHALIF SALAD

2-DAHIR ADAN SERAR



UJEEDO:- DHISID COMPANY BEERTA RAAS”

Maanta oo ay taariikhdu tahay **04/01/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed “Max’ed Notaayo”**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Ee Dhinac Galbeed Ee Daarta Maalin Tajir Ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

1- **ABDIRAHIN KHALIF SALAD**, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport No P01628095,

Ahan Gudoomiyaha Shirkadda

2-**DAHIR ADAN SERAR**, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport No P01349132, Ahna Gudoomiye Ku Xigeenka Shirkadda.

Mudanayaasha kor ku xusan iyaga oo caafimaad qaba, caqligoodunu taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxey i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA SHIRKADDA BEERTA RAAS**



**QODOBKA 2-AAD
WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA**

Shirkadda **BEERTA RAAS** Waxaa la aas'aasay 01-May-2020, Waxaana Lagu Aas'aasay Gobalka Shabeelada Hoose Ee Degmada Afgooye Ee Dalka Soomaaliya.



+252 612-223788
+252 615-353330

info@tayonotary.com
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia



**QODOBKA 3-AAD
XARUNTA SHIRKADDA**

Xarunta Shirkadda **BEERTA RAAS**, Waxay Ku Taala Degmada Afgooye Ee Gobalka Shabeelada Hoose Ee Dalka Soomaaliya, Waxayna Xafiisyo Iyo Laamo Ku Yeelan Kartaa Dhammaan Dalka Gudahiisa Iyo Dibaddiisaba.

**QODOBKA 4-AAD
NOOCA SHIRKADDA.**

Shirkaddani Waa Shirkad Saamiley Xadidan (Private Liability Company) Haddaba Saamile Kaste Waxuu Mas'uul Ka Yahay Hatidiisa Ku Jirto Shirkadda Inta Ay Dhantahay.

**QODOBKA 5-AAD
UJEEDADA SHIRKADDA**

Ujeeddada Shirkaddu Waa:

- Ka Ganacsiga Wax Soorka Beeraha Sida Qudaarta Nuucyadooda Kala Duwan
- Soo Saarida iyo Ka Ganacsiga Qudaarta Beeraha
- Gudashada Howl Kasta Oo La Xiriirta Maalgelinta Xoolaha Iyo Beeraha Dalka.
- Abuuridda Dakhli Cusub Oo Wax Looga Qabanayo Shaqa La'aanta Dalka Ku Baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta La Xiriirta Beeraha Dalka
- Keenida Farsamo Cusub Oo Ku Haboon Wax Soo Saarka Beeraha Dalka
- In Ay Qayb Wayn Ka Qaadato Dhisidda Dhaqaalaha Iyo Horumarka Bulshada Somaliyeed
- In Ay Abuurto Ila Dhaqaale Iyo Adeegyo Ay Ka Faa'idaystaan Beeraleyda Dalka Qaybaheeda kala Duwan.

QODOBKA 6-AAD

RA'SUMAALKA SHIRKADDA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.

Raa'sumaalka Shirkadda waa \$100,000 (Boqol Kun Oo Doller). Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka Shirkadda La Kordhiyo Ayada Oo Loo Marayo In Sheerer Loo Furo Maalgashadayaasha Cusub.Waxaana Loo Kala Leeyahay Sida Soo Socota.

NO	MAGACA MILKIILAYAASHA	Qiimaha Saamiga	Wadarta Saamiga	Boqoley
1	ABDIRAHIN KHALIF SALAD	\$60,000	\$60,000	60%
2	WARSAME MOHAMED OMAR	\$40,000	\$40,000	40%
	TOTALE	\$100,000	\$100,000	100%

**QODOBKA 7-AAD
QAAB-DHISMEEDKA SHIRKADDA**

GUDOOMIYE

G.KUXIGEEN



+252 612-223788
+252 615-353330

info@tayonotary.com
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia



QODOBKA 8-AAD

GUDDOONKA SHIRKADDA

Gudoomiyaha Ugu Horreeya Ee Shirkadda Waxaa Loo Magacaabay Mudane **ABDIRAHIN KHALIF SALAD** Oo Jagadaas Heynaya Inta Laga Bedelayo Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkadda, Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynba Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkadda. Marka Uu Maqan Yahay Gudoomiyuhu Waxaa Shaqadiisa Sii Wadaya G/Kuxigeenka Shirkadda Mudane **DAHIR ADAN SERAR** Wuxuuna Qaban Doonaa Shaqadii Uu Gudoomiyuhu Qaban Lahaa Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkadda, Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynba Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkadda.

QODOBKA 9-AAD

TIRADA DADKA AAS'AASAYAASHA AH

- Shirkaddu Waa Saamileey ay Lahaanshaheeda Leeyihiin Labo Qof Ee Sare Ku Xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay Labo xubnood oo ah Gudoomiyaha iyo G/Kuxiin, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, ayaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aas'aasayaasha shirkadda. Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.
- Qofkii lumiya xubinnimadiisa ama iibsada saamigiisa oo dhan waxaa ka reeban in uu sii isticmaalo magaca iyo astaanta shirkadda.

QODOBKA 10-AAD

BUUGGA HANTIDA SAAMILEYDA

Buugga hantida saamileyda waxaa ku cad qodobada soo socda:

- Inta uu la'eg yahay qiimaha saami kasta, inta saami uu leeyahay xubinkasta, magaciisa/magaceeda, xaddiga uu u dhiibay, taariikhda la dhiibay, lambarka boonada loo jaray, iyo dhamman warbixinadiisa oo tifatiran.
- Buuggaas waxaa keydinaya Gudoomiyaha iyo G/kuxiinka Oo ahna Maamulka shirkadda.
- Waxaa Saxiixaya Maamulka Shirkadda Marka La Dhameystiro Caddeymaha Saamiga Iyo Saamilaha.
- Saamilaha waxaa la siinayaa shahaado caddeyneysa saamigiisa, waxaana saxiixaya maamulka shirkadda.



+252 612-223788
+252 615-353330



info@tayonotary.com
www.tayonotary.com



Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia



QODOBKA 11-AAD

KORDHINTA IYO DHIMIDDA RA'SUMAALKA SHIRKADDA

Maaliyadda shirkadda waa la kordhin kara, waana la dhimi karaa, haddii ay sidaas isku raacaan xubnaha shirkadda lana waafajiyo sharciga shirkadda.

QODOBKA 12-AAD

IIBINTA SAAMI

Xubin Kasta Waxay Iibin Kartaa Saamigeeda Ay Ku Leedahay Shirkadda, Waxaana Mudnaanta La Wareegidda Koowaad Leh Xubnaha Shirkadda, Haddii Muddo lix Bil Ah La Waayo Xubin Ka Mid Ah Shirkadda Oo La Wareegta Saamiga La Iibinayo Saamiluhu Waxaa Uu Xaq U Leeyahay Inuu Ciddii Dalbaneysa Oo Aan Wadanka Danbi Ka Galin Ka Iibiyo Kadib Marka Ay Aqbalaan Qofkaas Gudiga Sare Ee Aas'aasayaasha.

QODOBKA 13-AAD

XUBINTII GEERIYOOTA

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

QODOBKA 14-AAD

ILAHA MAALGALINTA SHIRKADDA

Ilaha maalgelinta Shirkadda waa maalgelinta saamileyda, iyo Deymaha waafaqsan Shareecada Islaamka.

QODOBKA 15-AAD

XISAABTA SHIRKADDA

- 1- Xisaab xirka shirkadda:- xisaabta shirkadda waxaa la xirayaa 01 Janury ee sanadkasta .
- 2- Zekada:- xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixinayaa zekada ku waajibtay hantida shirkadda waxaana masuulideeda leh maamulka shirkadda (executive director).
- 3- Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:- qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida shirkadda.
- 4- Saamileyda Waxay Xaq u leeyihiin in ay qaataan Boqolkiiba Sodon 20% Faa'idadooda Sanadka Kowaad Sanadka Labaad iyo Sanadka Sadaxaad ee Marka Sanadka Xisaabta La Xiro 01 January.
- 5- Waxa laga jarayaa faida guud intaan laqey binin kahor 20% oo ah Kumeshan oo ay qaadana yaan howl wadeena shaqada.

QODOBKA 16-AAD

SHARUUDAHA KA MID NOQOSHADA

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara shirkadda:-

- Waa inuu ogolaansho ka haystaa shirkadda si uu uga mid noqdo saamileyda.
- Waa inuu dhiiba saamiga u xadidan shirkadda oo dhamaystiran.
- Waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka shirkadda.
- Waa in uuna dalka ka galin fal dambiyeed ama ficilo wax u dhimaaya sumcada qofka.



+252 612-223788
+252 615-353330

info@tayonotary.com
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia



QODOBKA 17-AAD
LUMINTA XUBINNIMADA

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

QODOBKA 18- AAD
MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.
Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 50 Sano.

QODOBKA 19- AAD
BAABI'IDDA SHIRKADDA

Shirkadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaado xaladaha hoos ku xusan:-

1. Haddii ay dhammaan xubnaha shirkadda isku raacaan baabi'inta shirkadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida shirkadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna weydo kabidda saamileyda.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'iniya shirkadaha nuucaan ah.

QODOBKA 20-AAD
HABKA UU KU DHACAYO BAABI'IDA SHIRKADDA

Baabi'idda shirkadda waxaa uu ku dhacayaa sida soo socota:-

1. Diyaarinta heerka maaliyadeed ee shirkadda.
2. Bixinta daymaha shirkadda lagu leeyahay.
3. Khasaaraha wuxuu ahaanaya hadba inta boqolkiiba uu saamigiisu la'eg yahay qofka.

QODOBKA 21-AAD
FADHIYADA SAAMILEYDA

Fadhiyada saamileyda waxay u dhacayaan sida soo socota:-

1. Kulamada caadiga ah ee saamileyda waxay dhacayaan sanadkiiba mar.
2. Kulamada aan caadiga ahayn, gudoomiyaha waxaa uu iskugu yeeri karaa kulamo deg deg ah haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan xubnaha shirkadda.
- 6- Xubin walba waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ogeysiis kulanka caadiga ah muddo bil ka hor

QODOBKA 22-AAD
CODKA SAAMILEEYDA

Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

QODOBKA 23-AAD
GUDOOMINTA SHIRARKA

Shirarka kala duwan ee shirkadda, waxaa shir gudoominaya gudoomiyaha shirkadda, haddii uu maqan yahay gudoomiyaha, waxaa shirarka gudoominaya ku xigeenkiisa ama cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho gudoomiyaha marka lawaayo ku xigeenkiisa.



QODOBKA 24-AAD

WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN

- Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo shirkadaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.
- F.g wixii shareecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

QODOBKA 25-AAD

ISTICMAALIDDA MAGACA SHIRKADDA

Magaca Shirkadda Ayaa Loo Isticmaalayaa Dhammaan Hantida Shirkadda Sida: Guryaha, Dhulalka, Gaadiidka, Bank Account, Heshiisyadda, Tiimbarayaasha Iwm.

QODOBKA 26

HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY


26 QODOB 1 COVER , 7 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.

SAXIIXA MILKIILAYAASHA

ABDIRAHIN KHALIF SALAD



DAHIR ADAN SERAR



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)


REP.1311/T.P.N/25, Tr. 04/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

By Shaxan



Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"





+252 612-223788
+252 615-353330

info@tayonotary.com
www.tayonotary.com

Bakara Market, Near Maalin Tajir
Building, Mogadishu - Somalia





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 04/01/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxiin Khaliif Salaad** Dukumintiga Cadeynta **Shirkada Beerta Raas** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 1311/T.P.N/25, Tr. 04/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Shirkada Beerta Raas
Taariikhda Caddeynta	04/01/2025

Wakiilka Loo Caddeeye: Aniga oo ah **C/raxiin Khaliif Salaad**, Leh Tel No. **0615568498**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Shirkada Beerta Raas**.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/raxiin Khaliif Salaad